



## Waxaad u ambaqaadi rabtaa Baadigoobka Waxqabadka Xuska Maalinta Dhulka ee lagu maamuusayo Maalinta Dhulka.

Xuska Maalinta Dhulku waa maalin loogu tala galay in bulshada caalamku iskugu timaaddo daafaha meeraheenna aan wadaagno – si wadajir ah, dunida weynu badali karnaa! Howlaha aad halkaan ka heleyso waxay kaa caawin doonaan in aad yarayso saamaynta aad ku leedahay Dhulka waxayna kuu noqon karaan lexjeclo fiican oo dhanka ilaha ah. Dhammaystir ugu yaraan ilaa saddex howlood si laguugu daro bakhtiya nasiib lagu helayo \$25 Kaarka Hadiyadda Visa ah\*. Maalinta ugu danbaysa Baadigoobka Waxqabadka Xuska Maalinta Dhulka waa Abriil 30keeda. Isku dayo wanaagsan!

Yaree

### □ Dabagalka Qashinka

Miyaad garanaysaa halka qashinkaagu tago marka uu ka baxo goobtaada? Haddii aad ku nooshahay gobolada Washington ama Ramsey, qashinkaaga waxaa la geeyaa Xarunta Dib u **Warshadeynta & Tamarka Ramsey/Washington (Xarunta R&E)** ee Newport. Xarunta R&E waxay kor u qaadaysaa soo kabashada khayraadka oo kaladuwaysaa wakhtiga ugu macquulsan ee qashin gubista, laakiin waxaan qaban karnaa intaa in kabadan! La soco wax kasta oo aad weelka qashinka ku riddo maantay. Maalinta dhammaadkeeda, eeg waxa aad tuurto inta badan. Miyaad samaysaa doorashooyin kuwaasoo yaraynta inta aad wax tuurto?

### □ Wax kubadalo!

Samee kala badalasho fudud ee sheeyada dib loo isticmaali karo si aad u yarayso qashinkaaga. Waxa jira habab badan oo aad iskugu badali karto taasoo yarayn karta qashinka (oo lacagna beekhaaminaysa!). Dooro sheeyada dib loo isticmaali karo halkii aad ka dooran lahayd kuwa halka mar la isticmaalo.

### □ Xarunta R&E iyo Kalasaraynta Qashinka

Wax ka ogow sida qashinku u kalasareeyo iyo halka qashinkaagu tago. Hubi **muuqaalkan** gaaban ee ka hadlaya Xarunta R&E si aad u ogaato waxa ku dhacaya qashinkaaga marka aad tuurto. Waa maxay waxa kaa yaabiyay? Waa maxay shayga aad tuurto ee kor la geyn karo kalasaraynta qashinka?

### □ Muuji Mahadnaq

Kaga mahadceli maqaaxida aad jeceshahay habdhaqanadeeda cagaaran, sida in ay ku siisay cuntooyin mar labaad la isticmaali karo ama isticmaalka maadooyin waara. Mahadnaqan waxaa lagu siin karaa si fool ka fool ah ama faallo onlayn ah.

### □ Cuntada: Aad u Wanaagsan oo aan la Khasaarin karin

Hadhaaga cuntadu waa caqabad wayn guud ahaan wadankeenna, taasoo 40% dhamaan cuntada la khasaariyo. Marka aan cuntada tuurno, waxaan khasaarinnaynaa lacag iyo dhammaan khayraadkii aan ku soo saarnay cuntadaas, kusoo rarnay cuntadaas, kagana dhigno mid daray ah. Waa maxay sheyga cuntada ee ugu dambeeyay ee aad tuurtay sabab ah inay xumaatay? Hubi talooyinkan ka yimid savethefood.org ee ku saabsan talooyinka sida aad si fiican ugu kaydin kartid cuntadaada, iskuday cuntooyinka cusub, oo cun kuwa lasoo reebay!

### □ Soo Adeego Adeeg Qashin Yar

Yaree qashinka markaad juogto dukaanka raashinka. Ku dhacqan mid kamid ah hababka dukaamaysiga hoose si loo yareeyo cuntada iyo gurista qashinka wakhtiga xiga ee aad dukaamaysi tagaysi!

**U iibso waxyaabaha si jumlo ah.** Iibsashada waxyaabaha aanan sajalaysneyn macnaheedu waxa weeye xaqiiqatan intee inle'eg ayaad doonaysaa oo aysan ubadneyn inaad khasaaris. **Isticmaal salladaha dib loo isticmaali karo.** Iskadaa caaga jilicdasan oo soo qaado salladaha dib loo isticmaali karo si aad ugu ridato alaabta badan!  
**Iibso waxyaabaha la miisaamo.** Dooro inta aad u baahan tahay oo ku rido weelkaaga si aad u tashiiso habaynta qashinka.

Dib u isticmaal

### □ Dayactir

Badalkii aad tuuri lahayd agabyada jabay, ku xujee naftaada in aad hagaajiso taa badalkeeda! Ka hubi ifixit.com casharo kaa caawinaya sida aad u hagaajin karto sheeyada caanka ah. Waxaad sidoo kale isha ku hayn kartaa dhacdooyinka Hagaajinta Waxyaabaha Jaba ee Gobolka Ramsey iyo sidoo kale dhacdooyinka Hagaajinta Waxyaabaha Jaba ee Gobolka Washington.

### □ Dib u isticmaalka Badeecada

Ma ogtahay in labada gobolba leeyihiin goobo aad ka heli karto badeecooyin bilaash ah sida riinjiyada, midabada, dareereyaasha mashiinada, nadiifiyayaasha agabka guriga? Marka dadku ay agabyadaan keenaan goobaha lagu rido qashinka guriga ee khatarta badan, badeecooyinka wanaagsan waxaa si bilaash ah lagu siiyaa dadka deegaanka. Kaalay oo baaro iskifaalayaasha oo arag wixi aad hesho!

### □ Iibso Alaabo Celis ah

Ugu deeqista waxyaabaha duugoobay waa arin wanaagsan, laakiin iibsashada alaabta celiska ah waa muhiim maadaama ay xaqiijineyso in sheeyadaas la isticmaalo. Marka xigta ee aad u baahato shay, ka eeg dukaanka waratada ee maxalliga, kasoo iibso xaraashka, ama ka eeg onlaynka, sida goobta iibka ee Facebook, Craigslist ama kooxdaada maxalliga ee waxbo ha iibsan.

### □ Ku deeq

Ugu deeqista ama kasoo iibsashada dukaamada alaabta waratada waa nidaam wanaagsan oo aad ku yarayn karto qashinka. Ku deeqidda wakhtigaaga adiga oo ku tabarucaya khaanadaha cuntada ama nadiifinaya goobaha dabiiciga ah ee kuu dhaw waa qaabab wanaagsan oo aad ku taageeri karto bulshadaada aadna ku ilaalin karto deegaankaaga aad degen tahay. Raadi hab aad ugu deeqdid bishan. Fursaduhu ma dhamaanayaan!

### □ Alaabta Guriga ee Negaata

Miyaad haysataa alaabta guryaha kuwaasoo lagayn karo guri cusub? Dukaamo warato oo badan oo iibiya alaabta celiska ah ama shirkadaha lamidka ah waxay si wanaagsan kaaga qaadi karaan alaabta guryaha, oo qaar badan xitaa waxay kuugu qaadi doonaan alaabtaada si bilaash ah! Haddii alaabta guriga kaliya ay u baahan tahay qurxin yar, tixgali inaad nolol cusub geliso adigoo hagaajinaya. Oo ugu dambayna, haddii aan la hagaajin karin oo wakhtigeedu dhamaaday, ka hubi alaab qaadaahaaga maxaliga ah si uu kuugu nidaamiyo qaadista qashinka badan!

Dib u warshadee

### □ Kala Sooc

Waxyaabaha dib loo warshadeyn karo waa badeeco. Xaqiijinta kaliya inaanu dib u warshadeyno sheeyada uu aqbalayo alaab qaadaahaagu waxay yareysaa isku hallaabida waxayna kor uqaadaa qiimaha sheeyadaan. Tijaabi aqoontaada adiga oo cayaaraya Cayaarta Baro Waxa La Tuuro!

### □ Qashinka Khatarta ah ee Guriga

Qashinka khatarta ah ee Guriga (HHW) waxaa kamid ah agabyada sida nadiifiyayaasha guriga, riinjiga, waxyaabaha riinjiga khafiifiya, batariyada, saliidda matoorada iyo sunta cayayaanka. Kubixi 15 daqiiqo inaad qashinka HHW ka raadiso gurigaaga oo qorshee sida aad si sax ah ugu qubi lahayd goobta kuugu dhaw ee la geeyo qashinka HHW.

### □ Waa maxay MRF?


Maxaad hadda tidhi? MRF waxay u taagan tahay "materials recovery facility (xarunta dib usoo celinta ashyaada)", halkaasoo sheeyaasha kujira weelka qashinka dib loo warshadeynayo la geeyo si loogu kala sooco dib u warshadeynta. Ka eeg waxa ka dhacaya Shakopee's Dem-Con MRF, ama baadh tusaalayaal kale oo ah tallaabooyinka MRF oo toos u socdo oo u diyaar noqo in lagaa yaabiyi.

### □ Noqo Halyayga Batariga!

Haddii ay iftiinto, qayliso ama dhaqdhaqaaqdo iyadood jaajar lagalin, waxay leedahay batari. Baytariyadu waxay sababi karaan dab marka ay ku danbeeyaan qashinka ama salladda dib u warshadeynta. Noqo Halyayga Batariga! Keen baytariyadaada aad isticmaashay goobta ururinta Gobolka Ramsey ama Xarunta Deegaanka Gobolka Washington.

### □ Hadhaaga Cuntada

Bilaw inaad ururisid hadhaaga cuntada si markaa dib loogu warshadeyn karo. Waxaad ku qudhmin kartaa hadhaaga cuntada deerkaaga ama waxaad ku ridi kartaa goobta ururinta ee gobolka. Hadhaaga cuntadu waxaa dib loogu celiyaa ciidda si ay u noqoto mid nafaqaysan!



### ☐ Sahmi Xarunta R&E

Miyaad ogtahay dhamaan qashinka ay soo saareen dadka deegaanka iyo ganacstada gobolada Ramsey iyo Washington la geeyo Xarunta R&E ee ku taala Newport halkaas oo lagu hagaajiyo si qiimahooda loo soo celiyo? Ogow waxyaabo badan oo ku saabsan halka ay sheeyaashu tagaan markaad tuurto adigoo soo sahaminaya Xarunta R&E. Guji si aad u daawato qaybta onlaaynka ama aad u saxeeexo sahamin shaqsi ah.

### ☐ Goobaha Nasashada, Goobaha Nasashada, Goobaha Nasashada!

Soo ogow mid kamid ah 24ka goobood ee gawaarida la dhigto ee gobolka ama ismaamulka ee daaraddaada! Guji si aad u hesho macluumaad ku saabsan goobaha nasashada ee gobolka Ramsey iyo goobaha nasashada ee gobolka Washington.

### ☐ Deg-deg u Bilaw

Ma jeceshahay inaad kalluumeysato? Agabka lagu dabo kalluunka ee maarta ka sameysan wuxuu sumayn karaa shimbiraha ceel-joogta ah, gorgorka iyo xayawaanada kale ee duurjoogta ah haddii ay liqaan. Agabka maarta ah ee aad wax ku dabato kuwa wax lagu dabto oo aanan maar ahayn kaga badalo Gobolka Ramsey ama Xarunta Deegaanka Gobolka Washington. Waa bilaash! Ma hubtid miyaa in agabka aad wax ku dabato ka sameysan yahay maar? Iskuday inaad agabka aad wax ku dabato ku xoqdo gabal warqad ah. Haddii ay wasakh ku reebto, waxay u dhowdahay in ay maar tahay.

### ☐ Ka hel Maktabaddaada Maxalliga ah

Akhri buug aad kala timid guriga ama mid kasoo amaaho si bilaash ah maktabaddaada dadweynaha. Booqo Maktabada Gobolka Ramsey ama websaaydada maktabadaha Gobolka Washington si aad uga hesho goobaha ay kuyaalaan maktabadaha.

### ☐ Weelka Daawada Lagu Rito

Keen oo ku rid khaanada loogu talagay halkii aad kaga tuuri lahayd goobta qashinka ama aad ku ridi lahayd suuliga. Waxaad ka caawin doontaa ka hortagga dembiyada, ku xadgudubka maandooriyaha iyo sumowga shilalka ah waxaadna ilaalin doontaa deegaankeenna. Raadi goobta sida bilaashka ah aad ugu ururin karto ee Gobolka Ramsey ama Gobolka Washington.

**Ka raadi habab badan si aad ugu lug yeelato  
EarthDayActionQuest.com.**

